

# Taageerooyinka Shaqsiga Hago: Su'aalo Iyo Jawaabo

(Self-Directed Supports: Frequently Asked Questions)



Hagida nafta ee adeegyadaada waa dooq loogu tallogalay dadka ka diiwaangashan barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Wisconsin. Waxay ku siineysaa qaab aad ugu yeelatid awooda badan adeegyada iyo taageerooyinka aad heshid.

Sida loo isticmaalo taageerooyinka shaqsiga hago waxay ku xirantahay haddii aad ka diiwaangashantahay midkood:

- Barnaamijka daryeelka muddada dheer la maareeyo:
  - Family Care
  - Partnership
  - PACE (Program of All-Inclusive Care for the Elderly) (Barnaamijka Daryeelka Dhammaan Loo dhanyahay ee Waayeelka)
- IRIS (Include, Respect, I Self-Direct) (Ku dar, Ixtiraam, Aniga Is Hago).

## Imisa adeegyo ayaan shaqsi ahaan hagaa?

### Family Care, Partnership, ama PACE

Waad hagi kartaa naftaada **qaar ka mid ah adeegyadaada**. Tusaale ahaan, waad hagi kartaa adeegyadaada daryeelka gaarka ah laakiin kooxda daryeelkaaga hakuu maareeyeen bixiyayaasha kaa caawiyo inaad heshid saedadka caafimaadka.

### IRIS

Waad hagi kartaa naftaada **oo dhammaan adeegyada daryeelkaaga muddada dheer**. Wuxaan heleysaa IRIS consultant agency (hay'ada la taliyaha IRIS), fiscal employer agent (wakiilka badrooniga maaliyada), iyo dad kale ee kaa caawiyo intaad ku sii jirtid.



WISCONSIN DEPARTMENT  
of HEALTH SERVICES

# Sidee ayaan u go'aansadaa adeegyad ee ayaan naf ahaan hagayaa?

## Family Care, Partnership, ama PACE

Markii aad iska diiwaangelisid, managed care organization (ururka daryeelka la maareeyay) (MCO) ayaa kuu xilsaarayo koox daryeel. MCO gaaga ayaa kaa caawinayo inaad raadisid oo aad heshid adeegyada aad u baahantahay. Inta lagu jiro nidaamka qiimeynta, waxaad la shaqeyneysaa MCO-gaaga si aad loo go'aamiyo adeegyada aad u rabtid inaad naf ahaan hagto, haddii ay wax jiraan.

Haddii aad dooratid inaad naf ahaan hagto hal adeeg ama ka badan:

1. MCO waxay ku siineysaa miisaaniyad aad ku bixisid adeegyadaan.
2. Wuxuu tilmaamaa yoolalkaaga iyo waxa aad u baahantahay inaad ku dabooshid. Waxaa sidoo kale ka mid ah adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan oo aad u heleysid sida qeyb ka ah IRIS si loo daboolo yoolalkaas.
3. Haddii aad caawin uga baahantahay howlaha daryeelka gaarka ah, waxaad u qalmi kartaa daryeelka gaarka ah ee shaqsiga hago. Wuu ka gooniyeysanyahay adeegyada kale ee aad ka heshid IRIS.
4. Wuxuu tilmaamaa yoolalkaaga iyo waxa aad u baahantahay kordhinta miisaaniyada, la taliyahaaga IRIS ayaa kaa caawinayo dhameystirka waraaqaha shaqada loo baahanyahay si u codsado lacago badan.

## IRIS

Markii aad iska diiwaangelisid, waxaad dooratay la taliye IRIS ah oo loo marayo IRIS consultant agency (hay'ada la talinta IRIS). Waxay ku taageeraan adoo sii dooranayo adeegyada.

1. IRIS consultant agency (Hay'adaada la talintaada IRIS) ayaa kula wadaagayo miisaaniyadaada la qiyaasay. Miisaaniyadaada waxaa ku jiro lacagaha aad ku isticmaaleysid inaad ku abuurtid qorshahaaga IRIS.
2. Wuxuu tilmaamaa yoolalkaaga iyo waxa aad u baahantahay inaad ku dabooshid. Waxaa sidoo kale ka mid ah adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan oo aad u heleysid sida qeyb ka ah IRIS si loo daboolo yoolalkaas.
3. Haddii aad caawin uga baahantahay howlaha daryeelka gaarka ah, waxaad u qalmi kartaa daryeelka gaarka ah ee shaqsiga hago. Wuu ka gooniyeysanyahay adeegyada kale ee aad ka heshid IRIS.
4. Wuxuu tilmaamaa yoolalkaaga iyo waxa aad u baahantahay kordhinta miisaaniyada, la taliyahaaga IRIS ayaa kaa caawinayo dhameystirka waraaqaha shaqada loo baahanyahay si u codsado lacago badan.



## Yaan kireysan karaa inuu adeegyo bixiyo?

Dhammaan barnaamijada, waad dooran kartaa shaqaalahaaga. Waxay noqon karaan xubin qoyska ah, saaxib, ama qof kaloo u qalma. Dhammaan shaqaalaha waxay u baahanyihii inay dhameystiraan baarista taariiqda oo la ansixyaa ka hor intaan lacagta la siin ee adeegyada laguugu siinayo.

## Sidee ayaan u kireysan karaa shaqaale adeegyo i siiyo?

Barnaamijyadoo dhan, waxaa jiro dooqyo oo sida loo helo shaqaale ku siiyo taageerada shaqsiga hago:

- **Waxaad noqon kartaa badrooniga**—Tanoo ka dhigan inaad shaqaaleysid, kireysatid, tababartid, oo aad maareysid shaqaalahaaga. Sida badrooni ahaan, waxaad masuul ka noqoneysaa ansixinta xaanshida waqtiga iyo dajinta qiimooyinka saacadlaha, sidoo kale sida howlaha kale.
- **Waxaad la shaqeyn kartaa hay'ada**—Tanoo ka dhigan koox kale inay maareyso shaqaalaha adeegyada ku siiyo adiga.

Haddii aad ku dhibtootid inaad heshid shaqaale ama hay'ado, MCO-gaaga ama la talinta IRIS ayaa soo jeedin karto illaha iyo bixiyayaasha wuxtarka kuu noqon karo.

## Sida adeegyada loo lacag bixiyo?

### Family Care, Partnership, ama PACE

Waxaad heleysaa fiscal employer agent (wakiilka badrooniga maaliyada). Waxay ka isticmaalaan miisaaniyada MCO-gaaga si ay u ugu lacag bixiyaan adeegyada ku jiro qorshahaaga taageerada shaqsiga hago. Waa inaad ansixsaa lacag bixinta.

### IRIS

Fiscal employer agent (Wakiilkaaga badrooniga maaliyada IRIS) ayaa bixiso lacagta xaanshiyada waqtiga iyo sheegashooyinka adeegyada ku qoran qorshahaaga IRIS. Waa inaad u ansixisaa xaanshiyaha waqtiga shaqaalaha aad kireysaneysid.

Waxaad bixin kartaa qaar ka mid ah adeegyada kale ee IRIS aysan la daboolin kaarkaaga Medicaid ForwardHealth.

### Qoraalada:



WISCONSIN DEPARTMENT  
of HEALTH SERVICES